# Sida loo Coddeeyo

Somali

Sida loo Coddeeyo / Somali

# Sida loo Coddeeyo

## U qalmitaanka

Waxaad ugu coddeyn kartaa doorashada ka dhacaysa degmada Toronto haddii aad tahay:

- muwaadhin Kanadiyan ah; iyo
- ugu yaraan 18 sanno jir; iyo
- qof degan magaalada Toronto; ama
- qof aanan-deganayn magaalada Toronto; laakiin adiga iyo xaaskaaga/ninkaaga aad leedihiin guri ku yaala magaalada; iyo
- lagaaga celinin coddeynta hoosta wax sharci ah.


Kaliya waxaad ku coddeyn kartaa halmar doorashada ka dhacaysa degmada Magaalada Toronto ayada oo aan la eegaynin inta guri ee aad ku leedahay ama ku kireysid Magaalada. Waxaa khasab kugu ah in aad ku coddeysid meesha aad ku nooshahay.

## Coddeynta

Shaqaalaha doorashada ayaa:

- kusalaamaya kadibna kugu hagi doonta meesha aad u baahantahay in aad aadid
- ku weydiin doonta aqoonsigaaga midkaas oo caddeynaya magacaaga iyo cinwaanka aad ku leedahay Toronto
- baaritaan kusamayn doonta aqoonsigaaga ayada oo ku fiirinaysa liiska codbixiyayaasha, kadibna magacaaga ka tiri doonta liiska
- gelin doonta warqadaada codbixinta fayl sir ah kadibna ku tusi doonta in aad calaamadaysid warqadaada codbixinta
- kugu hagi doonta shaashada laga coddeeyo

Waxaad ku:




- calaamadayn doontaa warqadaada codbixinta adiga oo geliya godka ukunta u eg ee ku yaala midigta musharaxa aad doonaysid.
- coddeyn doontaa halmar xafiis kasta warqada codbixinta
    - Haddii aad khalad samaysid, ama bedeshid maskaxdaada waxyaabaha ku saabsan qofka aad doonaysid in aad u coddeysid, u geey warqadaada codbixinta shaqaalaha doorashada midkaas oo burin doona warqadaada codbixinta kuuna samayn doona midkale.
- celin doontaa warqadaada codbixinta calaamadaysan faylka sirta ah kadibna u geey shaqaalaha doorashada midkaas oo gelin doona ama u dhiibi doona warqadaada codbixinta qalabka ama qofka nidaaminta
    - Haddii ay jirto wax mushkilad ah oo ku saabsan warqadaada codbixinta, qalabka ama qofka nidaaminta ayaa soo celin doona. Shaqaalaha doorashada ayaa ku siin doona doorashada helida ama qaadashada warqad codbixin oo cusub ama ka dhigaya qalabka ama qofka nidaaminta in uu aqbalo warqada codbixinta calaamadaysan.

    - Haddii aad qabtid wax su'aalo ah oo ku saabsan sida loogu calaamadeeyo si sax ah warqada codbixinta, midkasta oo kamid ah shaqaalayaasha doorashada ayaa diyaar u ah in uu midaasi kuu sharxo.
- coddeysay si guul ah marka warqadaada codbixinta laga aqbalo dhinaca qalabka ama qofka nidaaminta

# Caddeyn

## Lambarka. 1 - Caddeynta U qalmitaanka

Haddii uu qof ku weydiiyo xaqa aad u leedahay coddeynta, waa in aad ku dhaaratąa caddeynta u qalmitaanka - si aad u xaqiijisid in aad u qalantid. (fiiri: U qalmitaanka)

> Aniga, (sheeg magacaaga), waxaan caddeynayaa in aan u qalmo in aan coddeeyo weligayna hore uguma coddeynin doorashadan.

## Lambarka. 2 - Caddeynta Turjumaanka

Haddii aad u baahantahay caawimaad turjubaan, waxaad weydiin kartaa qofkasta oo aan ahayn musharax ahayn ama baarayayaal in uu kuu noqdo turjumaankaaga.

Turjumaanka waa in uu ku dhaarto caddeynta kahor inta uusan caawimaada bixinin. Kuuma raaci karo dhinaca gadaasha shaashada coddeynta.

> Aniga, (sheeg magacaaga), waxaan caddeynayaa in aan ugu turjumayo si run ah waxkasta oo caddeyn, dukumenti ama su'aal ah oo la siiyo coddeeyaha iyo jawaabta.

## Lambarka. 3 - Caddeynta Saaxiibka Coddeeyaha

Haddii aadan calaamadayn karin warqada codbixinta, waxaad codsan kartaa saaxiib in uu kugu caawiyo. Saaxiibka waa in uu ku dhaarto caddeynta. Qofka saaxiibkaaga ah wuxuu kuu raaci karaa dhinaca gadaasha shaashada coddeynta. Qofka saaxiibkaaga ah kaliya waxaa loo oggolyahay halmar, aan ka ahayn guryaha kalkaalanimada, ama xubnaha qoyska.

Aniga, (sheeg magacaaga), waxaan caddeynayaa in aan:

- u calaamadayn doono warqada codbixinta sida la iiga sheego in aan sameeyo dhinaca coddeeyaha
- isku dayin in aan saameyn ku yeesho go'aanka coddeeyaha
- qarinayo sida uu u coddeeyay codbixiyaha

# Tusaalooyinka Aqoonsiga Qofka

**Aqoonsi caddeynaya magacaaga iyo cinwaanka aad ku leedahay Toronto. Kaarka macluumaadka coddeeyaha looma adeegsan karo sida aqoonsiga.**

- Rukhsada baabuurka Ontario
- Kaarka Caafimaadka Ontario (kaar sawir oo cinwaan ku qoran)
- Kaarka Sawirka Ontario
- Oggolaanshaha baabuurka Ontario (qaybta baabuurka)
- jeeg shakhsiyeed la buriyay
- bayaan amaah guri, heshiis kiro ama ijaar xiriir la leh guri ku yaala Ontario
- siyaasada ceymiska ama bayaanka ceymiska
- heshiis deyn ama heshiis dhaqaale kale midkaas oo ah machad dhaqaale
- dukumeenti ama shahaado laga soo saaray dhinaca maxkamada Ontario
- dukumeenti kasta oo kale oo ka ahaada dhinaca dowlada Kanada, Ontario ama degmad ku taala gudaha Ontario ama ka ahaada dhinaca wakaalad ama dowladaasi
- dukumeenti kasta oo kale oo ka ahaada dhinaca Guddiga Urur ku yaala Ontario midkaas oo lagu sameeyay hoosta Qaanuunka Hindiya (Kanada)
- oggaysiis qiimeyn canshuur dakhli ah
- Bayaan Dheef Canshuur Ilmo
- Bayaan ah Dheefaha Ceymiska Shaqaalaynta La bixiyayT4E
- Bayaanka Dammaanada Da' Weynaanta T4A (OAS)
- Bayaanka Dheefaha Qorshaha Lacagta Hawl-gabka Kanada T4A (P)
- Bayaanka Qorshaha Lacagta Hawl-gabka Kanada ee Tabarucaada
- Bayaanka Dhigaalka Tooska ah ee loogu talogalay Shaqaalayaasha Ontario
- Bayaanka Dhigaalka Tooska ah ee Barnaamijka Taakulaynta Naafada Ontario
- Ammaanka Goobta Shaqada iyo Bayaanka Dheefaha Ee Guddiga Ceymiska T5007
- qiimeynta canshuurta guriga
- bayaanka kaarka deynta, bayaanka koontada bangiga, ama RRSP, RRIF, RHOSP ama bayaanka T5
- Kaarka CNIB ama kaar ka ahaaday dhinaca urur sadaqo diiwaangashan midkaas oo siinaya adeegaha dadka qabba naafooyinka
- kaar isbitaal ama diiwaan
- dukumeenti muujinaya deegaanka xaramka jaamacada, midkaas oo laga soo saaray dhinaca xafiiska ama shaqaalaha mas'uulka ka ah deegaanka ardayga ee machadka kadib-dugsiga sare
- dukumeenti muujinaya deegaanka ah guri daryeel muddo-dheer ah oo ah hoosta Qaanuunka Guryaha Daryeelka Muddada-Dheer, 2007, midaas oo uu soo saaro Maamulaha guriga
- biil qalab loogu talogalay biyo, biyo, gaas, teleefoon ama fiilo TV ama biil ka ahaaday dhinaca guddiga qalabka dadweynaha
- warqad jeeg, bayaanka T4 ama rasiid lacag bixin uu soo saaro qofka loo shaqeeyo
- qoraal ama kaar warbixin ka ahaada dhinaca iskuulka kadib-dugsiga sare